



CBS

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA
البنك المركزي الصومالي
CENTRAL BANK OF SOMALIA

XAFIISKA ISGAARSIINTA
مكتب الاتصالات
COMMUNICATIONS OFFICE

Tix. 1004-XI-07-22

Muqdisho, Nofeembar 14, 2022

War-Saxaafadeed: ladagaalanka lacagdhiqista iyo ka hortagga maalgelinta argagixisada.

Nofeembar 14, 2022- Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa maanta wuxuu shir la qaatay madaxda bankiyada gaarka loo leeyahay oo shatiga ka haysta Bankiga Dhexe.

Shirkan oo qeyb ka ah shirarka joogtada ah ee Bankiga Dhexe u qabto bangiyada ganacsiga ayaa wuxuu ku saabsanaa dardar gelinta howlaha adeegga bangiyada iyo ilaalinta shuruucda, gaar ahaan sharciga ladagaalanka lacagdhiqista iyo ka hortagga maalgelinta argagixisada (AML/CFT).

Gudoomiyaha Bankiga Dhexe, Abdiraxmaan Maxamed Cabdullahi, oo ka hadlay shirka ayaa yiri; "Waxa ugu muhiimsanaa oo aan shirka uga hadalnay in dhammaan bankiyadu xoojiyaan dedaalkooda ku aaddan ka hortagga iyo la dagaallanka maalgelinta argagixisada".

"Maadaama dalku uu ku jiro marxalad amni waxaa lagama-maarmaan ah in bangiyadu ay feejignaanaa dheeraad ah nuujiyaan, si loo hubiyo in aan lacag faldambiyeed ku shaqa leh dhex marsiin bangiyada dalka."

Waxaa sidoo kale ka hadlay shirka iyo wixii la isku afgartay madaxa Ururka Bankiyada Soomaaliyeed, Yasiin Maxamed Cibaar. "Shirka maanta waxaa la iskula qaatay in bankiyadu ay aad uga feejignaadaan halista la xiriirta Lacag-dhaqidda iyo Maalgashiga Argagixisada. Waxaa kale oo hoosta laga xariiqay in lacagaha laga shakiyo degdeg loogu wargeliyo hay'adaha ku shaqada leh sida hay'adda Warbixinta Maaliyadeeda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya - FRC."

Bankiga dhexe waxaa ka go'an horumarinta, kobcinta iyo ilaalinta xasiloonida hab-maaliyadeedka dalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xidhiidh:

+252 615 30 90 60

communications@centralbank.gov.so www.centralbank.gov.so

PO Box 11 Corso Soomaaliya 55, Muqdisho, Soomaaliya

CBS